

Carruurta iyo Dhallinta qaba Baahiyaha Daryeelka

www.doh.wa.gov/cyshcn

Washington State Department of HEALTH

# Xogta Macluumaadka Tallaalka COVID-19 iyo Tallaalka Hargabka

## Xog loogu talagay daryeel bixiyaasha

Talaalka ayaa si gaar muhiim ugu ah children and youth with special health care needs (CYSHCN, carruurta iyo dhallinta qaba baahiyaha daryeelka caafimaadka gaarka ah) sababtoo ah waxay khatar dheeraad ah ugu jiraan inuu ku dhaco COVID-19 iyo Hargabka. Tan waxaa sabab u ah inay qabaan xaalado caafimaad oo horey u jiray oo waxay xidhiidh toogabn la leeyihiin adeeg bixiyaasha daryeelka caafimaadka. Waxay sidoo kale dhibaato ku qabi karaan xirashada maaskarada, farxalashada, iyo inay ka fogaanshaha dadka kale.

Centers for Disease Control and Prevention (CDC, Xarumaha Xakamaynta iyo Ka Hortagga Cudurrada) iyo American Academy of Pediatrics (Akademiyada Maraykanka ee Dhakhaatiirta Carruurta) ayaa ku talinaaya in tallaalka COVID-19 iyo tallalka hargabka la siiyo qof kasta oo jira 6 bilood iyo wixii ka wayn.

**COVID-19**

- ☐ Tallaalka COVID-19 ee Pfizer ayaa waxaa lagu talinayaa dadka jira 6 bilood iyo wixii ka weyn.
- ☐ Tallaalka COVID-19 ee Moderna ayaa waxaa lagu talinayaa dadka jira 6 bilood iyo wixii ka weyn.
- ☐ Tallaalka COVID-19 ee Novavax ayaa waxaa loo heli kara dhammaan dadka jira 12 sano iyo wixii ka weyn.
- ☐ Tallaaladani aad bay badqab u yihiin oo waxay wax badan ka taraayaan ka difaacida carruurta iyo dhallinyarada caabuqyada neef-mareenka.

**HARGABKA**

- ☐ Cirbadaha: Ma jirto nooc gaar ah oo tallaalka Hargabka ah oo loogu taliyay dadka da'doodu u dhaxayso 6 bilood ilaa da'do 64 jir. Dhammaan tallaalada Hargabka ee 2023-24 waxay ka difaacaan afar nooc oo fayraska hargabka ah. Waxtarka tallaalka ayaa la cusboonaysiiyaa sannad kasta si uu wax uga qabto noocyada hargabka ee hadda socda.
- ☐ Ku bufiinta sanka Kani waa tallaal waxtar wax ku owl ah leh. Waxaa loogu talaglay dadka da'doodu tahay 2 sano ilaa 49 sano. Laguma talin dadka uurka leh, dadka difaaca jirkoodu daciifyahay, dadka waaweyn, iyo dadka qaba xaaladaha caafimaadka qaarkood.
- ☐ Talaalka leh kuuro sare iyo waxtar badan: Waxay leedahay waxtar difaac oo adag. Waxaa loogu taliyay dadka waaweyn ee da'doodu tahay 65 sano iyo wixii ka weyn.

## Maxay tahay sababta carruurta loo tallaalayo?

Qaadashada talaalku waxay muhiim u tahay ilaalinta badqabka carruurta intay joogaan dugsiga iyo markay la joogaan saaxiibadood iyo qoyskooda. Carruurta qaatay talaalka aad ayay u yar tahay inay xanuun daran qaadaan, isbitaal la dhigo, ama ay u dhintaan markuu ku dhaco COVID-19.

- Carruurta uu ku dhaco COVID-19 ayaa waxaa sidoo kale ku dhici kara dhibaatooyinka caafimaad oo muddada dhow iyo muddada fog ah, uuna ku jiro "COVID-19 dabo dheeraada." Dhibaatooyinka qaarkood, sida xanuunka caabuqa bararka wato (MIS-C), ayaa noqon kara mid

daran kaas oo keeni kara in qofka isbitaal la dhigo ama uu xataa u dhinto. Tallaalku waa habka ugu fiican ee looga dhigayo carruurta kuwa caafimaad qaba oo badqabo.

- Carruurta uu ku dhacay Hargabku ayaa yeelan karaan dhibaatooyin caafimaad ee muddada dhow iyo muddada fog, oo ay ku jiraan xaalado caafimaad ee dhanka wadnaha.

Tallaalku waa habka ugu fiican ee looga dhigayo carruurta kuwa caafimaad qaba oo badqabo.

## CYSHCN ayaa khatar dheeraad ah ugu jiri kara xanuunka daran ee COVID-19 iyo Hargabka

Carruurta leh baahiyaha daryeelka caafimaadka gaarka ah ama qaba xanuunnada qaarkood ayay u badan tahay inay xanuun daran qaadaan haddii uu ku dhaco COVID-19 ama Hargabka. Tallaalku waa hab muhiim ah oo carruurta looga difaaco xannuunada neefmareenka.

Qaab kale oo carruurta loo difaaco waa in la hubiyo in dadka kale ee guriga kula nool ay qaatan talaalka buuxa iyo kuurada xoojinta. Taasi waxay ka dhigan tahay inay muhiim u tahay waalidiinta iyo daryeeleyaasha inay qaataan talaalka, sidoo kale.

## Tallaalka COVID-19 iyo Tallaalka Hargabka waa kuwo badqab u leh CYSHCN

Carruurta iyo dadka waawayn ee qaba xanuunnada dabadheeraadka ah ayaa qaadan kara talaalka COVID-19.

Sababta keliya ee qof uusan u qaadan karin talaalka waa haddii uu ku qabo xasaasiyad loo dhiman karo (xasaasiyad u baahan qalabka epi pen) waxaa kamid ah maadooyinka ku jira talaalka.

- Maadooyinka ku jiraTallaalka COVID-19
- Maadooyinka ku jiraTallaalka Hargabka

Faa'iidooyinka tallaalka ayaa aad ooga miisaan badan halisaha laga dhaxli karo ee ku aadan qaadista xannuunka. Laxariir dhakhtarka caafimaadka cunugaaga haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah oo kusaabsan tallaalka.

## Ciladaha ka dhalan kara

Khatarada caafimaadka ee qaadista caabuqa COVID-19 ama Hargabka ayaa aad ooga badan halista waxyeelada kasoo gaarta qaadashada tallaalka. Waa wax caadi ah in carruurtu dareemaan ciladaha ka dhalan kara qaarkood kadib marka ay tallaalka qaataan. Dhibaatooyinka badanaa ka dhasha waa:

- Xanuunka dhanka gacanta ah
- Murqo Xanuun
- Daal
- Madax xanuun
- Qandho
- Qarqaryo

Waydii dhakhtarka cunugaaga sida aad ku dejin karto xanuunka cunugaaga haddii uu xanuun ka qaado talaalka. Sidoo kale waxaad ku mashquulin kartaa hawlo meel bilaa buuq ah. Inta badan ciladaha ka dhasha tallaalka ayaa ka baxa hal ama labo maalmood gudahood.

Haddii cunugaagu xasaasiyad daran ku qabo talaallo kale, wali wuu qaadan karaa tallaalka COVID-19 iyo tallaalka hargabka. Dhakhtarka daryeelka carruurta ayaa kaa codsan doona inaad sugto ku dhawaad 30 daqiiqo kadib marka cirbada lagu dhufto si looga fiiriyo xasaasiyaad degdeg ah.

Khatarta ka qaadista xasaasiyad ee ku aadan tallaalka midkood ayaa ah mid aad u hoosaysa. Khatarta ah in ay yeeshaan astaamo halis ah ka dib caabuqa neef-mareenka ayaa aad uga sareeya marka loo eego khatarta ah in ay yeeshaan waxyeelo halis ah tallaalka ka dib. Halkan ka ogoow xog dheeraad ah oo ku saabsan ciladaha ka dhalan kara talaalka COVID-19.

Tallaalka COVID-19

Tallaalada hargabka

**Haddii ay kusoo wajahdo xaalad caafimaad oo degdeg ah kadib qaadashada tallaalka COVID-19, wac 9-1-1 isla markiiba.**

## Sideen ayaan ku tallaalaa canugeyga?

Waydii dhakhtarkaaga carruurta haddii uu bixiyo tallaalka COVID-19 iyo tallaalka Hargabka. Haddii uusan bixin, waxaad adeegsan kartaa aaladeena Raadiyaha Talaalka.

## Codsashada caawimaado gaar ah

Marka aad balan qabsato ama aad timaado goobta tallaalka, u sheeg shaqaalaha in cunugaagu u baahan yahay caawimaad dheeraad ah. Tusaale, waxaa suuragal ah inuusan awoodin inuu xirto maaskaro ama uu fariisto aaga sugitaanka kadib marka cirbada lagu dhufto. Waxaa laga yaabaa in nalalka iyo qolalka buuqa badan ay dhibayaan. Waxaad codsan kartaa caawimaad gaar ah sida:

- Inuu soosocdo kadib marka cirbada lagu dhufto halkii uu ka fadhin lahaa.
- In dhakhtarku cunugaaga talaalka siiyo asagoo cunugu gaarigiisa ku jira.
- In uu cunugaaga la joogo wehelka uu ugu jecel yahay inta uu joogo xarunta caafimaadka.
- In cunugaaga talaalka lagu siiyo qol aan buuq lahayn oo ka fog dadka kale.

## Xagee Ayaan ka Heli Karaa Macluumaad Dheeraad ah?

Si aad u hesho macluumaadkii ugu dambeeyay ee ku saabsan tallaalka dhalinyarada:

Si aad u hesho xogtii ugu danbaysay ee ku saabsan talaalka COVID-19, booqo VaccinateWA.org/Kids.

Si aad u hesho xogtii ugu danbaysay ee ku saabsan talaalka Hargabka, booqo Flufreewa.org

Ilaha Kale:

- Tilmaamo ka socda American Academy of Pediatrics oo ku saabsan Daryeelida CYSHCN Inta lagu jiro Cudurka Safmareenka ah
- Macluumaadka Hargabka iyo Taageerada CDC Dadka Naafada ah.
- Ilaha COVID-19 ee loogu talagalay CYSHCN ee ka socda Lucile Packard Foundation.
- Xogta iyo Taageerada COVID-19 oo kasoo baxay ururka Informing Families.
- Hagaha Hargabka ee Waalidiinta si ay uga caawiyaan ilaalinta iyo daryeelka caruurtooda.
- Kaarka Warbixinta COVID-19 ee Department of Health iyo Sheekada Bulshada ee Xarunta Daryeelka Caafimaadka ee Dadka Naafada ah waxay kaa caawin kartaa la xidhiidhka ilmaha ama dhalinyarada ee ku saabsan tallaalka.
- Laynka taleefanka ee Helitanaka COVID EE DADKA INDHOOLKA AH (360-947-3330) ayaa u sahlaaya dadka indhoolka ah iyo kuwa aragoodu liito inay su'aalo ka keenaan helitanaka

khayraadka la xariira COVID-19. BLINDCOVID.com ayaa qaban doona khayraad iyo wargelin dheeraad ah oo la xariira baaritaannada tallaalka, goobaha tallalaka, iyo la jaanqaadista nolol maalmeedka cudurka safmareenka ah.

- Wixii su'aalo ah ee u gaar ah CYSHCN, fadlan iimayl u dir cyshcn@doh.wa.gov.

Si aad dukumiintigaan ugu heshid qaab kale, wac 1-800-525-0127. Haddii aad tahay macaamiil dhagool ah ama aad maqal culus
tahay, fadlan wac 711 (Washington Relay) ama iimayl udir doh.information@doh.wa.gov.